

Dhibcaha Derejooyinka cusub

Dhibcaha 7da heer

Dhibcaha 7da heer

Dhibcaha cusub waxaa la yidhaahdaa dhibcaha 7da heer, waayo waxay ka kooban yihiin toddoba derejo. Si loo gudbo imtixaanka waa in ardaydu helaan derejooyinka 02, 4, 7 ama 12. Ma gudbayo ardaygii hela dhibcaha 00 ama -3. Sidaas awgeed derejada 02 waa ta ugu hoosaysa dhibcaha lagu gudbo imtixaanka.

Faahfaahinta dhibcaha derejada

Sida ka muuqata jadwalka, derejo kastoo ka mid ah dhibcaha 7da heer waxay leedahay faahfaahinteeda. Waa in faahfaahintaas loo adeegsado maaddadaha oo dhan, marka la bixinayo derejo ku salaysan dhibcaha 7da heer.

Dhibcaha 7da heer

Magac	Faahfaahin	ECTS	
12	Bandhig heer sare ah	Derejada 12 waxaa la bixiyaa marka si heer sare ah, oo gaadhsisan heerkii laga rabay maaddada, oo waxba aan la dhimin ama waxaan micno lahayni maqan yihiin, loo soo bandhigo jawaabta.	A
10	Bandhig xoog u fiican	Derejada 10 waxaa la bixiyaa marka si xoog u fiican, oo ku siman heerkii laga rabay maaddada, oo waxaan micno lahayni ka maqan yihiin, loo soo bandhigo jawaabta.	B
7	Bandhig fiican	Derejada 7 waxaa la bixiyaa marka si fiican, oo ku dhow heerkii laga rabay maaddada, waxna ka maqan yihiin, loo soo bandhigo jawaabta.	C
4	Bandhig iska ladan	Derejada 4 waxaa la bixiyaa marka si iska ladan, oo ku yar dhow heerkii laga rabay maaddada, waxyaabo muhiim ahina ka maqan yihiin, loo soo bandhigo jawaabta.	D

02	Bandhig kaafi ah	Derejada 02 waxaa la bixiyaa marka si kaafi ah, oo heerka ugu hooseeya ee la oggolaan karo ah, loo soo bandhigo jawaabta.	E
00	Bandhig aan kaafi ahayn	Derejada 00 waxaa la bixiyaa marka si aan kaafi ahayn, oo heer aan la oggolaan karin ah, loo soo bandhigo jawaabta.	Fx
-3	Bandhig xun	Derejada -3 waxaa la bixiyaa marka si liidata oo aan la oggolaan karin loo soo bandhigo jawaabta	F

Waa maxay sababta Dhenmark u qaadatay dhibco derejeed cusub?

Sababo badan baa lama huraan ka dhigay dhibco derejeed cusub. Mid ka mid ahi waa in derejooyinka dheenishku noqdaan dar u dhigma kuwa caalamka. Taasi waxay ardayda dheenishka u fududaynaysaa in loo qaato machadyada waxbarashada dalalka debedda, iyo inay helaan natiijoooyinka imtixaannada dheenishka iyo kuwa debedda oo lagu caddeeyey shahaadado isku mid ah.

13ka dhibcood way adag tahay in lagu sarjaro dhibco derejeedka dalalka kale, siiba dhibco derejeedka dalalka Yurub (dhibcaha ECTS), oo ka kooban toddoba heer. Sidaas awgeed dhibcaha 7da heer way fududahay in lagu sarjaro.

Meelo badan oo dalalka debedda ah waxaa jirta, in waxbarashada loo qaato keliya, hadduu qofku haysto derejooyin sarreyya. Haseyeeshee dhibcaha 13, derejada sare waa "derejo aan caadi ahayn" oo dhif iyo naadir la bixiyo. Dhibcaha 7da heer ma laha derejo aan caadi ahayn.

Sabab kale waxay tahay, dhibcaha 13 waxaa loo adeegsadaa siyaabo kala duwan marka la eego maaddad - maaddad iyo waxbarasho - waxbarasho.

Goormay dhaqangelayaan dhibcaha 7da heer?

Waxbarashooyinka dugsiyada sare waxay dhibcaha derejooyinka cusubi ka hirgaleen 01. ogost 2006. Waxbarashooyinka kale ee soo hadhay, waxay dhibcaha 7da heer ka kala dhaqangelayaan 01. ogost iyo 01. Sebtambar 2007.

Boggan ka akhri faahfaahin dheeraad ah oo la xidhiidha dhibcaha derejada cusub:

www.umv.dk/nyskal